

WARBIXINTA GUDIGA FULINATA

Dambigu wuxuu u geystaa bulshada khasaaroyin kala duwan. Marka lagu daro khasaaroyin sida hanti luntay, kharash caafimaad iyo mushaar la'aan ku yimid daawaca, waxaa kaloo jira khasaaroyin aan loo jeedin oo la soo gudboonaado dhibanayaasha sida xanuun iyo silac. Danbiyo kaloo badan ayaan loo soo gudbin ciidanka amniga, sidaas darted waxaa faa'iido ah in la helo habab kale sidii si buuxda loo fiiran lahaa lana baari lahaa waxa dadka ka soo mareey dambiga iyo waxa uu u geystay.

Sanad 2007, Hay'ada United Way & Magaalooyinka Mataanaha iyo Waaxda Amniga Guud Xaafiiska Barnaamijyada Caddaalada waxa ay isku kaashadeen sahan goboleed loogu tala galya in lagu baaro waaya aragnimada daku u leeyihiin dembi, dhibaato geyn iyo saameyntiisa. Warqado Sahan lagu buuxinaayo qalin ayaa si aan la qorsheyn loogu dira 10,200 dad qaan gaar ah Gobolka Minnesota oo dhan; 5,588 jawaad ayaa soo noqotay.

Warbixintani waxa ay si toosan ugu jeedaa dadkii ka soo jawaabay in ay lakulmeen colaadda guriga. Waxa kaloo sii guda galaysaa xiriirka ka dhexeeya gaar ahaan colaadda guriga iyo sida guud ahaan ula kulmeen dhibanayaashu dembiyo guud.


Isku soo duub, baaristan waxa ay tuseysaa:

- Sanadkii 2007, seddex boqolkiiba dumarka la tira baaray iyo hal boqolkiiba raga waxa ay sheegeen ama soo tebiyeen in colaad guri waayo arkeen. Ayadoo lagu saleynayo dadka qaan gaarka Gobolka Minnesota, tani waxa u bedelmaysaa ilaa 57,000 haween iyo 18,000 rag ah in ay waayo arkeen colaadda guriga sanadkii 2007.
- Isku soo duub, 27 boqolkiiba dumarka la tira baaray iyo toddobo boqolkiiba raga waxa ay sheegeen ama tebiyeen in ay la kulmeen colaad guri inta ay noolaayeen.
- Seddex-iyo-toban boqolkiiba dadkii loogu yimid dhulkan Marykanka (Native Americans) waxa ay tuseen in ay waayo arkeen colaad guri intii ay noolaayeen. Labaatan boqolkiiba Dadka African Americanka ah iyo kuwa ay kala dhaleen qaruumo laba/kuwa kala waxa ay sheegteen colaad guri, sidoo kalens, 15 boqolkiiba ay sheegeeten Dadka Caddaanka. Dadka ka yimid aasiya waxa la sheegay in eey soo sheegeen boqolkiiba afar 4% colaad guriga oo keliya – ayaga ayaana ugu hooseeya.
- Dhibanayaasha colaad guri waxa ay u badanyihiin in ay shaqeeyaan waqti aan buuxin iyo in ay sameeyaan daqli yar. Seddex tobankii dhibanayaal colaad guri waxa ay sheegeen ama soo tebiyeen in ay sameeyeen sanadkii daqli \$30,000 ama ka yar ayadoo loo barbardhigayo 19 boqolkiiba inta kale oo soo jawaabtay.
- Celcelis ahaan, jawaabayaalka la soo cadaadiyay waxa ay la kulmeen seddex qayboob oo colaad guri sanadkii 2007, balse u gudbiyeen booliska boqolkiiba hal qayb waxa ka yar. Markii la weydiiyay waxa ay ugu sheegin booliska, seddex-meelood meel waxa ay qireen in ay arrintu tahay mid gooni ah isla markaana afar-meelood-meel waxa ay qireen in cadaadiska colaad gurigu uu gaarsiisneyn in loogu yeero booliska. 17 boqolkiiba oo keli ah inta soo jawaabtay ayaa u sheegeen booliska dhacdadii ugu horeysay ee colaad guriga.


- Ilaa afar tobankiiba jawaabayaal la kulmay colaad guri sandkii 2007 waxa dhamaaday xiroorkoodii, sidoo kalana seddex tobankii jawaabayaal waxa ay sheegeen in aysan talaabo ka qaadin colaadda.
- Dhibanayaasha colaad gurigu waxa ay dareemayaan amaano la'aan haddii loo eego inta kale oo degan Gobolka Minnesota; dhibanayaasha colaad guri ee aan ahayn caddaanka waxa ay dareemayaan in ay ku badbaadeyn bulshadooda iyo in ay aad uga baqayaan in noqdaan dhibanayaal colaad aad u xun.

Daraasadda waxa ay qeexeysaa isi saarka u dhexeeya colaad guri iyo dembiyo kale dhibaatooyin keena. Dhibaatooyinka faraha badan waxa ay tilmaamayaan waayo arragnimo badan ay soo mareen dhibanayaasha colaad guri iyo baahida loo qabo adeegyo guud iyo hay'adaha adeegyada bixiya oo haysta wargelin fiican.

Celceliska boqolkiiba intii soo jawaabtay sanadkii 2007 kuwaasoo la kulmay danbiyada (N=5,588)



Boqolkiiba dhibanayaasha danbiyada, sidoo kalena ah dhibanayaal colaada guriga



*Sadeedan danbi ayaa dadka waayo aragnimada u leh ay ka yartayah boqolkiiba hal marka loo darasado o idil. Wixii ka soo baxa waa in si taxadar leh loo eegaa.

Garaafka kore waxa uu tusayaa guud ahaan qeybaha boqolkiiba kuwa ka soo jawaabay sahanka ee la kulmay nooc waliba ee dembi ah sanadkii 2007.

Garaafka hoosena waxa uu tusayaa boqolkiiba intii soo jawaabtay sidoo kalena ah dhibanayaasha colaadda guriga.